Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor ee Onteeriyo

Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor wuxuu adeegyo u fidiyaa carruurta laga bilaabo markay dhashaan ilaa ay bilaabaan dugsi. Waxaa carruurta iyo qoysaskoodaba loo fidiyaa gees-ka-gees gobolka qiimeyn iyo adeegyo taxan oo daaweyn ah kuwaasi oo ka jira bulshooyin kala duwan oo fara badan, intii suurtagal ahna u dhow hooygooda.

Haddii aad wax tabasho ah ka qabto hadalka iyo xirfadaha luqadda ee ilmahaaga waxaad kaalmo ka heli kartaa Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor. Shaqaalaha barnaamijkuna wuxuu ku bari doonaa sidii aad uga caawin lahayd imahaaga horumar inuu ka gaaro xirfadaha war is-gaarsiinta, isla markaasina aad siin lahayd fursadda ugu fiican ee uu ku gaari lahaa hourmar caafimaadqaba. Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor ee Onteeriyo waxa uu adiga adeegyadiisa kuugu fidinayaa lacag la'aan kaagamana baahna inuu takhtar ku soo xawilo.

Weligeedna ma aha wax lagu kallahay (deg-degay) in lagu caawiyo.

Wixii warar ah ee intaasi dhaafsiisan kala xiriir Barnaamijkaaga maxalliga ah ee Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor ama wac lambarka INFOline-ka Dawladda Onteeriyo ee hoos ku qoran.

Wixii warar ah ee dheeraad ah, la xiriir:

Dawladda Onteeriyo
INFOline: waa lacag la'aan
1-866-821-7707
TTY 1-800-387-5559
www.children.gov.on.ca

Your preschool child's speech and language development
Catalogue 7710-3137821 Somali June/07 ©Queen's Printer for Ontario

BARNAAMIJKA HADALKA IYO LUQADDA CARRUURTA DUGSI-BILAABIDDA KA HOR (PRESCHOOL SPEECH AND LANGUAGE PROGRAM)

Horumarinta hadalka iyo luqadda ilmahaaga dugsi bilaabidda ka hor

Ontario

Ka hor intaanu gelin dugsi, ilmahaagu waxa uu ku mashquulsan

yahay inuu hadlo oo wax sahamiyo (baaro) oo uu ciyaaro. Dhammaan waxqabadyadaasina waxaa weeyaan kuwo lama huraan u ah korriinshihiisa iyo horumarkiisaba - iyo inuu barto xirfadaha war is gaarsiinta.

Markuu ilmahaagu gaaro waqtigii uu bilaabi lahaa inuu dugsi tagana, wuxuu u baahnaan doonaa inuu lahaado xirfado war is-gaarsiineed - si uu samaysto asxaab, una barto waxyaabo cusub oo uu bilaabo inuu barto inuu wax akhriyo waxna uu qoro. Xirfadaha war is-gaarsiintuna waa wax lagama maarmaan u ah guusha mustaqbalka ee ilmahaaga.

Adna door weyn ayaad ka ciyaartaa horumarka joogtada ah ee ilmahaagu ka gaarayo war is-gaarsiinta. Inaad la hadsho, lana ciyaarto oo aad dhegaysatid ilmahaagana waxay ka caawin doontaa inuu dhisto xirfadaha uu u baahan yahay inuu guul kaga gaaro dugsiga iyo noloshaba.

Qiyaas ahaan 10-kii caruur ahba hal ayaa u baahan inuu horumar ka gaaro hadalka caadiga ah iyo xirfadaha luqadda. Caawimaaddan la'aanteedna, halgan bay ku tahay ilmaha inuu wax dhegaysto oo uu hadlo, waanay ku adag tahay inuu la ciyaaro carruurta kale.

Dhacdooyinka muhiimka ah ee horumarineed

Dhacdooyinkaasi muhiimka ah ee horumarineed waxay muujinayaan qaar kamid ah xirfadaha tilmaamaya horumarka carruurta yar-yar marka ay baranayaan inay sameeyaan war is-gaarsiin. Haddii ilmahaagu uu la kulmi waayo mid kamid ah dhacdooyinkaasi ama ka badanba, fadlan la xiriir Barnaamijkaaga maxalliga ah ee Hadalka iyo Luqadda.

Markuu yahay 3 jir

- wuxuu fahmaa su'aalaha "Kee", "Maxay", "Halkee", iyo "Waayo"
- wuxuu sameeyaa jumlado dhaadheer isagoo isticmaalaya 5 ilaa 8 erey
- wuxuu ka hadlaa dhacdooyin la soo dhaafay sida - safar lagu tegay guriga awowyaasha, maalin la joogay xarunta lagu hayo carruurta
- wuxuu sheegaa sheekooyin sahlan
- wuxuu muujiyaa jecaylka uu u qabo carruurta uu la ciyaaro kuwa uu ugu jecel yahay
- wuxuu isku hawlaa tallaabooyin fara badan oo uu ku muujinaayo sidii wax ciyaaraya oo kale sida - isagoo cunto karinaya ama gaari hagaajinaya
- sida badanna dadka ka baxsan qoyskana way fahmaan isaga waqtiyada intooda badan
- wuu ka warqabaa waxay qabtaan wixii la daabacay sida - bug yaraha ay ku qoran yihiin cuntooyinka yaal makhaayadaha wax laga cuno, liistooyinka, calaamadaha
- wuxuu leeyahay xiiso bilow ah oo uu u qabo, iyo ka war-heyn, dhawaaqyada isku dhow

Markuu yahay 4 jir

- wuxuu raaca jihayn ka kooban 3 ama ka badan oo tallaabo sida - "Marka hore keen warqad (xaashi), dabeetana sawir masawir, ugu dambeyntana sii hooyo"
- wuxuu adeegsadaa naxwe la nooc ah kan dadka waaweyn
- wuxuu ka sheekeeyaa sheekooyin asagoo si waadax ah u sheegaya bilowgooda, bartankooda iyo dhammaadkoodaba
- wuu hadlaa asagoo isku dayaya inuu mushkilado la xalliyo dad waaweyn iyo carruur kaleba
- wuxuu muujiyaa ciyaaro khayaali ah oo uu maskaxdiisa ka hindisay fahamkooduna uu aad u dhib badan yahay
- qiyaastiina mar walba dadka qalaad asaga way fahmaan
- wuxuu awood u leeyahay in uu sameeyo ereyo isku si u dhawaaqma oo sahlan - sida "cat-bat" ("bisad-fiidmeer")
- xarfaha qaarkood ayuu waafajiyaa dhawaqooda - sida "xarafka T wuxuu dhahaa 'tuh'

Markuu yahay 5 jir

- wuxuu raaca jihayn kooxeed - sida "dhammaan carruurtaay keena wax lagu ciyaaro"
- wuxuu fahmaa jihayn ka kooban "hadii…dabeeto" - sida "haddii aad xiranayso kabaha lagu ordo, dabeeto waa inaad sirada jimicsiga istaagtaa"
- wuxuu si tifaftiran u sifeeyaa dhacdooyinkii la soo dhaafay, kuwa jooga iyo kuwa soo socda
- wuxuu baadi-goobaa inuu raaligeliyo saaxiibadiis/ saaxiibadeed
- muxuu muujiyaa xornimo soo kordhaysa oo ku lug leh saaxiibtinnimada - waxaa suurtagal ah asagoo/ayadoo ayna cid kale la socon inuu / inay booqasho ku tago/tagto deriska
- wuxuu qiyaas ahaan isticmaalaa dhammaan dhawaqyada luqaddooda asagoo aan qalad samaynayn ama uu yar yahay
- wuxuu yaqaan dhammaan xarfaha alifbeetada
- wuxuu gartaa bilolwga dhawaaqyada ereyada qaarkood sida - "Pob wuxuu ku bilaabmaa dhawaqa 'Puh' "

Tijaabi qaar kamid ah talooyinkan soo socda si aad uga caawiso ilmahaaga inuu isticmaalo ereyo uu ku xalliyo mashaakil, waxna ku doorto, kuna sifeeyo waxyaalo iyo dhacdooyin oo afkaarna dad kula wadaago.

Saddex-jiradu way jecel yihiin marka aad:

- Siiso waxyaabo kala duwan si aad ugu dhiirrigeliso inuu wax sawiro waxna feegaaro, kuwaasi oo ay kamid yihiin tabaashiirta (jeesada), qalin-rasaasyada, qalimada midabka leh, calaamadeeyeyaasha, rinjiyada faraha.
- Isticmaasho ereyada sifaha sida midabbada iyo kuwa isku lidka ah (kulul/qabow, weyn/yar, ded-deg/tartiib (qunyar) iyo ereyada falka sida (duulaya, biyo-ku-batalaqaysanaya, ordaya) marka aad ayaga la hadlayso.
- Siiso waqti dheeraad ah oo ay ra'yigooda kugula wadaagaan.
- Siiso doorasho ay wax ku kala xushaan kuna saabsan - cuntooyinka ay cuni lahaayeen, waxyaabaha ay ku ciyaari lahaayeen, dharka ay xiran lahaayeen.
- U sameyso dhawaaqyo iyo naxwe sax ah - ilmuhu wuxuu ku oranayaa "he wunned" (wuxuu rabay) adna waxaad oranaysaa "haa, wuu cararay".
- Akhrido buugaag la saadaalin karo soo celcelisna ah - hakadna aad samayso si aad ilmaha u siiso fursad uu ku buuxiyo erayada iyo jumladaha gaagaaban.
- La ciyaarto iska-yeelyeelidna aad la samayso! Waxa suurtagal ah inay jeclaystaan inay matalaad ka sameeyaan qeybo kamid ah fiidyowyadooda ay ugu jecel yihiin, ayagoo matalaaya ayagoo wax ka cunaya makhaayad ama noqonaya macallin ama dab-demiye.

Saddex-jiradu way jecel yihiin marka aad:

- Siiso fursado aad u fara badan oo ay kula ciyaaraan carruur kale - markay joogaan xarunta kaydka buugaagta, seeraha lagu nasto, xarunta sannadaha hore (The Early Years Centre). Mararka qaarkoodna, waxay jecel yihiin inay hal ama labo saaxiib ugu yimaadaan hooygaaga si ay ula ciyaaraan.
- Farta ku fiiqdo ereyo buugaag ku qoran oo fartaadana aad hoos marsiisid marka aad u akhriyayso.
- Ka hadasho dhacdooyin sida ay isugu xigayaan (u kala hor marayaan) - oo aad sharaxdo waxa ugu horreyn dhacaya, waxa ku xiga iyo wax ugu dambeeya - "marka hore gacmaheenna ayaan dhaqaynaa, dabeetana cuntu fudud ayaan cunaynaa ugu dambeyntana weelkeenna ayaan ku ridaynaa meesha weelka lagu dhaqo ee jikada".
- Ku dhiirrigeliso inay ka sheekeeyaan sheekooyinkooda - adigoo ka codsanaya inay kaaga sheekeeyaan wixii maalintaasi la soo dersay, inay sifeeyaan filim ay daawadeen, kuuna sheegaan buugga ay ugu jecel yihiin.
- U akhrido buugaag leh ereyo dhawaaqoodu uu isu dhow yahay sida - "mouse / house" (jiir / guri), oo fartana aad ku fiiqdo dhawaaqyada bilowga ereyada - "Mommy wuxuu ku bilaabmaa dhawaaqa 'mmm' - kuwaasi oo ka bilaabma xarafka M".

Shan-jiradu way jecel yihiin marka aad:

- Adeegsato ereyo cusub oo adag sida - "ka hor / kadib", "qalafsan / siman", "hawlyar / dhib-badan", "u dhexeeya / dhinaca ku haya", "isku mid ah / kala duwan",
- Ka hadasho lambarro iyo waxyaabo tiradood sida - "badan / yar", "ka sii badan / ka yar", "hal / kuwo badan".
- Ka codsato inay saadaaliyaan waxa kadib dhici doona - "Maxaad u malaynaysaa inay dhici doonaan marka uu Saam furo hadiyaddiisa xuska maalintuu dhashay?", oo aad u sharaxdid asbaabaha ka dambeeya doorashooyinka - "Maxaan ugu baahan nahay inaan xirano jaakeedyadeenna maanta?"
- Midkiinba markiisa sheeko uga sheekeeyo kan kale idinkoo adeegsanaya sawirada ku jira buugaag - carruurtu waxay jecel yihiin inay maqlaan adigoo hadlaya waxayna dabeeto doonaan inay markooda qaataan si ay ku abuuraan qaabkii ay dhinacooda sheekada uga sheekayn lahaayeen.
- U oggolaato inay gacan ka geystaan dhacdo qorsheynteeda. Marka aad ka hadahsho waxa aad u baahan tahay inaad samayso ka hor xaflad lagu xusayo maalin-dhalasho, ama sidii loogu diyaar garoobi lahaa in la tago beerta xawayaanka la daawado lagu xannaaneeyo. Marka aad weydiiso ilmahaaga su'aalaha "waayo" iyo "sidee" adigoo hadlaaya.
- Ka codsato inay ku caawiyaan. Wuxuu ilmahaagu jeclaysan doonaa inuu kaa caawiyo inaad dubtid buskud, miiska cuntadana aad diyaariso, dhar wixii la dhaqaayana aad kala soocdid, i.w.m. Marka aad siiso tilmaan-bixin oo aad aragtid haddii ay awoodi karaan inay kuu sheegaan tallaabooyinka.